



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod. 39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 15aad
Taariikhda: 21-01-2026	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 12:07 PM	Saacadda uu Xirmay: 13:24 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka sare Senator Cali Shacbaan Ibraahim	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka XFS Dr Cali Xaaji Aadan	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka 2. Ansixinta Ajendaha 3. Akhrinta 2aad ee Hindise-sharciyeedka Daawada.

Furitaanka Kulanka:

Senator Xuseen Maxamed Daahir ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka sare Senator Cali Shacbaan Ibraahim ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendaha kulanka, codaynta ayaa u dhacday sidaan:

Oggol: 28 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka sare Senator Cali Shacbaan Ibraahim ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada, Arrimaha Bini'aaddanimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka Golaha Aqalka Sare Sen.Dr.Prof. Cusman Maxamud Maxamed Dufle, si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinta Akhrinta 2aad ee Hindise-sharciyeedka Daawada. Warbixinta kaddib, 6 senator ayaa dood iyo soodeejin ka yeeshay Hindise-sharciyeedka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka sare Senator Cali Shacbaan Ibraahim ayaa faray Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada, Arrimaha Bini'aaddanimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka Golaha Aqalka Sare in ay soo diyaariyaan qodobada laga doodday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii, Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka sare Senator Cali Shacbaan Ibraahim ayaa kulanka soo xiray Sacadu markay ahayd **13: 24 PM.**

DHAMAAD